# Golaha Wakiiladda

## WAAXDA SHURUUCDA, HADAL-QORAALKA IYO FADHIYADA

**Kal-fadhigii 44aad fadhigii 2aad**

***Axad, 22 November 2020***

**Quraanka: -** Md. Obsiiye

**Gudoonka: -** Gudoomiye Baashe M. Faarax

**Ajandaha Fadhiga:-**

- Doodda Ajandaha Kal-fadhiga 44aad ee Golaha Wakiilada.

**Md. C/raxman Maxamed Jaamac (Xoog):-** Shir-gudoonka, Xildhibaanada iyo shaqaale waynahaba waxaan idinku salaamayaa Salaanta Islaamka, bacda Salaan, maanta waxaan gudagalaynaa doodda Ajandaha kal-fadhiga 44aad, anigu halkan waxa ku qoran xeerar farabadan oo qiimoheedo leh, hase yeeshe waa inaynu muhiimad kala siino marka anigu Waxaan xeerarka ugu horeeya ka dhigayaa kuwan.

1. **Xeerka ka hortaga, xakamaynta iyo ka ganacsiga iyo Tahriibka dadka,** madaama ay dhalintii shaqo la'dahay, way tahriibayaan oo liibiyaa dhalinyaradii lagu wada haysta oo lacaga madax furasho ah loo hasyta, marka xeerka ka ganacsiga iyo tahriibka dadka waxaan siinayaa muhiimada kowaad.
2. **Wax ka badalka iyo kaabista Xeerka Saxaafadda,** Xeerkaas oo anagu hayno hadaanu nahay Gudidda Arrimaha Bulshada oo aanu kal-fadhigii horena siminar aan gudoominayay u qabanay, xeerkaasina mudo badan buu Golaha horyaalay, marka xeerkaas oo u baahan in lataliyayaashu indhaha mariyaan anaguna soo dhigno, waxaana loo baahan yahay xeer kala haga saxaafadii iyo xukuumadii oo sharci u sameyno.
3. **Wax ka badalka iyo kaabist Xeerka Maamuuska Madaxweynaha iyo Baarlamaanka,** xeerkaas oo madaxweynuhu soo celiyay inaynu eegno wixii uu ka soo badalay oo isagana ka dhigno xeerka saddexaad.

Marka anigu saddexdaas xeer baa soo jeedinayaa inaynu muhiimada kowaad siino oo mudadaas yar ka gaadhsiino, waana xeerar ay tahay in muhiimada ugu horeysa la siiya.

**Md. Axmed Barkhad Obsiiye:-** Shir-gudoonka, Xildhibaanada iyo Marti-sharafta iyo Saxaafada dhamaantiina waxaan idinku salaamayaa Salaanta Islaamka ASC, anigu Ajandahan Kal-fadhiga 44aad waxaan ugu soo horeysiinayaa

1. **Xeerka Ganacsiga Aaga Cashuuraha ka caagan,** xeerkaas oo aynu kal-fadhigii hore dhamaadkiisii ka doodnay, waa xeer muhiima oo loo baahan yahay inay dib u dhigno maahe waa inaynu Xeerka kowaad ka dhigno.
2. **Xeerka Hay'adda Dekadaha** oo isna la socday Xeerkaas hore isna raacino.
3. **Xeerka Diiwaangalinta Shirkadaha Aaga Cashuuraha ka caagan** oo isaguna ahaa xeerkii saddexdaad ee labadaas Xeer la socday.
4. **Wax ka badalka iyo kaabist Xeerka Maamuuska Madaxweynaha iyo Baarlamaanka,** Xeerkaasina waa mid muhiima oo loo baahan yahay baarlamanaka ha ahaado ama ka soo socdee waa in la helaa Xeerkii Maamuuskooda.
5. **Wax ka badalka iyo Kaabista Xeerka Nidaamka Ururada iyo Axsaabta Siyaasada,** waayo Xeerkasi waa xeer u baahan in dib loogu noqdo oo axsaabta aad bay u liitaan marka in xeer adag loo sameeyo weeyaan, intaasaan ku soo koobayaa, WSC.

**Md. C/qaadir Jaamac Xaamud:-** ASC, salaanta islaamka dabadeed, waxaan anigu leeyahay horta sidiisa ajandahan waa 17 xeer oo wakhtigaynu haysano kuma dhamayn karno, marka inta ugu muhiimsan oo aan isleeyahay aad baa loogu baahan yahay baan ka soo qaaadayaa, waxaana u soo kala horeysiinayaa sidan:-

1. Wax ka badalka iyo kaabist Xeerka Maamuuska Madaxweynaha iyo Baarlamaanka,
2. Wax ka badalka iyo Kaabista Xeerka Nidaamka Ururada iyo Axsaabta Siyaasada.
3. Xeerka ka hortaga, xakamaynta iyo ka ganacsiga iyo Tahriibka dadka waxaana ku dari lahaa Anshaxa guud.
4. Xeerka Sahminta Shidaalka
5. Xeerka Hay'adda Caymiska

Marka intaas hadaynu kal-fadhigan dhameyno waxa u malaynayaa shaqo badan baynu qabanay, mida kale Mudanayaashu waa inay xili hore yimaadaan, oo shir-gudoonku xil iska saartaan si xili hore xildhibaanadu u yimaadaan, WSC.

**Md. Maxamuud Axmed Obsiiye:-** Shir-gudoonka, Xildhibaanada iyo Marti-sharafta iyo Saxaafada marka hore waxaan idinku salaamayaa Salaanta Islaamka ASC, salaam ka dib, Ajandahani ma xuma laakiin wuxuu u baahan yahay dib u habeyn, Xeerarkan ajandaha ku qorani waxay u kala qaybsan yihiin qaar Golewaynaha horyaal oo qaarkood Madaxweynaha ka soo noqday, Xeerar cusub oo qaranka muhiim u ah intooda badana Gudiyadu gacanta ku hayaan kuwaaso ay ku xidhan tahay siday u soo dhamaystiraan, anigu marka waxaan odhan lahaa waxa la hormarinayaa wixii Golewaynaha horyaal.

1. Wax ka badalka iyo kaabist Xeerka Maamuuska Madaxweynaha iyo Baarlamaanka,

2. Miisaaniyada Qaranka ee Sanadka 2021 markay timaado
3. Xisaab Xidhada Sanadaha 2018kii iyo 2019kii
4. Xeerarka Madaxweynaha ka soo noqday ee Golaha horyaal
5. Xeerka Ganacsiga Aaga Cashuuraha ka caagan
6. Xeerka Hay'adda Dekadaha
7. Xeerka Diiwaangalinta Shirkadaha Aaga Cashuuraha ka caagan
8. Wax ka badalka iyo Kaabista Xeerka Nidaamka Ururada iyo Axsaabta Siyaasada
9. Wax ka badalka iyo Kaabista Xeerka Tamarta.
10. Xeerka Hay'adda Caymiska Qaranka
11. Xeerka Liisamada Ganacsiga
12. Xeerka ka hortaga, xakamaynta iyo ka ganacsiga iyo Tahriibka dadka, xeerkaan waxaan odhan lahaa waa in lagu ka hortaga lacagta foojariga ah waayo waxa soo badatay lacag dollar foojari ah oo dalka soo galay xeer ka yaalna ma jiro marka Xeerkaas ha lagu daro ayaan soo jeedinayaa mar hadii uu tahriib tahay.
13. Wixii Xeerar qabyo-qoraal ah ee la soo diyaariyo inaynu ku xejino.

**Md. Xasan Xuseen Shide (Daarood):-** Bismilaahi, Shir-gudoonka, Xildhibanada, Saxaafada iyo dadweynaha Somaliland dhamaantiin ASC, Ajandahan in horyaal waxa ku jira xeerar badan oo dhamaantood muhiima, waxa jira Xeer aad u muhiima oo ah.

1. **Xeerka Liisamada Ganacsiga,** waxa jira in umada wax badan iskaga dhex khaldan yihiin oo jumladlihii iyo tafaariiqlihii iyo noocyadii kale aan la kala garanayn, ninka badeecada keenayaa hadii uu ilaa kaaryoonihii yeesho waa khalad oo lakala macaashi maayo, waxa kale oo khatar inagu haya kaalmaha shidaalka oo hadii aad eegto marka saldhiga dawladaha hoose laga soo bilaabo madaxweyne ku-xigeenkii hore gurigiisa la soo gaadhayo wadadaas oo qudha 21 kaalmood oo qaarkood isku nabanyihiin baa ku yaal, khatarna dadka way ku hayaan oo hadii mid gubto wax lagu bakhtiiyo ma haysano biyuhuna bakhtiin maayaan, markaa in la kala fogeeyo oo ugu yaraan 5km isu jiraan wixii dambe oo sharciga Xeerkan lagu xidho weeye. Marka xeerkaas muhiimada kowad baan siinayaa.
2. **Xeerka ka hortaga, xakamaynta iyo ka ganacsiga iyo Tahriibka dadka,**
3. **Wax ka badalka Xeerka Saxaafada.**

Wixii kale ee Golaha horyaal ee Madaxweynaha ka soo noqday in lagu xejiyo, intaasaan ku soo koobayaa, WSC.

**Md Xuseen Ismaaciil Yuusuf:-** Dhamaan waxaan idin salaamayaa Gudoomiyaha, Xildhibaanada iyo Saxaafada, bacda salaam Ajandahan oo aad u balaadhan

wakhtiga aynu haysano oo koobana aynaan ka wada gaadhsiin karayn, waxaan odhan lahaa sidaa u yahay ha loo daayo laakiin waxaan soo horaysiin lahaa oo aan kuwa ugu horeeya ka dhigi lahaa sidan.

1. Wax ka badalka iyo kaabist Xeerka Maamuuska Madaxweynaha iyo Baarlamaanka sidiisa ayaan ugu dayn lahaa kan kowaad.
2. Waxaan ku xejin lahaa Xeerarka sida wayn loogu baahanyahay ee kala ah

- Xeerka Ganacsiga Aaga Cashuuraha ka caagan
- Xeerka Hay'adda Dekadaha
- Xeerka Diiwaangalinta Shirkadaha Aaga Cashuuraha ka caagan

Inta kale sidoodaan u daynayaa, waad-mahadsan tihiin, WSC.

**Md. Xaamaud Cismaan Cigaal:-** Shir-gudoonka, Xildhibaanada, kaaliyayaasha, Marti-sharafta iyo Saxaafada ASC, bacda salaam, Gudoomiye adigoo naga maqan barigii dhowayd ee uu Gudoominayay ku-xigeenka 1aad Md. Axmedyaasiin waxa noogu dambeeyay oo la keenay Xeerka Aaga Ganacsiga Cashuuraha ka caagan iyo xeerka dekadaha, dooddu waxay ahayd madaama uu yahay arrin aad u adag xaga qawaaniinta xildhibaanadu aanay aad aqoon caynkaasa ugu lahayn oo markii aan doodaynay waxaanba islahaa waxaad adigu tahay kan golaha ugu dooroon aqoonta caynkaasna laakiin aniguna expert kuma ahi, marka waxaanu dalbanay in la keeno dad dibadaha laga keeno oo inaga caawiya aqoonta iyo khibrada arrimaha caynkaas wixii qawaaniin la xidhiidha u leh, marka la soo celinayo ee laga doodayo inay diyaar ahaadaan dadkii ka doodi lahaa, taasi waa taas.

Xeerkan ugu horeeya ee **Wax ka badalka iyo kaabista Xeerka Maamuuska** hadii aanu madaxweynuhu soo celin waxaan odhan lahaa inaga daaya, sababtoo ah waxa ka soo baxay in la yidhaahdo Baarlamaanku lacag bay korodhsanayanaan hadaynu xaga hore soo dhignona waxa la odhan waa wixii la sheegayay, marka waxaan soo jeedinayaa in xeerkaas xaga dambe la mariyo, marka waxaan anigu kuwa ugu horeeya ka dhigayaa

1. Xeerka Ilaalinta Xuquuqda Caruurta, waayo waad ogtihiin caruurta dhibaatooyin badan baa loo gaysta sida tii u dambeysay ee aynu halkan kaga hadlaynay ee inta la kufsiday hadhka looga dhacay.
2. Xeerka Hay'adda Caymiska oo waxaan ka dhigayaa kan labaad ee aynu muhiimada siino.
3. Wax ka badalka iyo Kaabista Xeerka Ururada iyo axsaabta Siyaasada

Xeerka Diiwaangalinta Shirkadaha Aaga Ganacsiga Cashuuraha ka caagan wuxuu la mid yahay kuwii aan soo sheegay oo isaguna wuxuu u baahan yahay dad khibrad u leh oo inaga caawiya, intaasaan ku soo koobayaa, WSC.

**Md. Cabdi Maxamuud Jaamac (Gaagaale):-** ASC, anigu waxaan ugu soo horeysiinayaa.

1. Wax ka badalka iyo Kaabista Xeerka Ururada iyo Axsaabta Siyaasada
2. Xeerka Shaqaalaha Dawlada
3. Wax ka badalka iyo kaabista Xeerka Maamuuska M iyo Baarlamaanka

Marka xeerka kowaad waxaan ka dhigi lahaa kan saddexaad, waxaana ka soo horeysiinayaa labadaas xeer, inta kale sidiisa ayaan u dayn lahaa, WSC.

**Md. Ibraahim Axmed Raygal:-** Mudane Gudoomiye iyo Mudanayaal marka hore salaam iyo isu soo noqod wanaagsan, marka xigta ajandahan la soo diyaariyay waa mid aad u qurux badan, aniguna fikradaan ka dhiibanayaa waa sidatan, marka warbixinta Shir-gudoonka iyo gudiyada oo ugu horeysa la dhageysto, waxaan soo jeedinayaa Xeerarka oo kuxiga in 5 xeer oo Golelwaynaha horyaal ilayn inta kale Gudiyaday ku maqan yihiin la soo horaysiiyo oo mudnaanta kowaad la siiyo, inta marka laga gudbo xeerarka kale waxaan ka soo xushay 6 ka mid ah oo kala ah

1. Xeerka ka hortaga, xakamaynta iyo ka ganacsiga iyo Tahriibka dadka
2. Miisaaniyada Qaranka ee Sanadka 2021ka
3. Wax ka badalka iyo Kaabista Xeerka Ururada iyo Axsaabta Siyaasada
4. Xeerka Ganacsiga Aaga Cashuuraha ka caagan
5. Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah
6. Xeerka Ilaalinta Xuquuqda Caruurta

Marka anigu 5taas ee Golewaynaha horyaal iyo 6daas aan soo xushay inaynu ka gaadhsiino, wixii kale ee soo raacaya sida ansixinta masuuliyiinta iyo warbixinadooda iyo wixii kale ee soo kordha, intaas marka la isku daro in ajanduhu inoo noqdo ayaan soo jeedinayaa WSC.

**Md. Maxamuud Ismaaciil Xasan (Badde):-** Ajnadahani aad buu u fiican yahay, laakiin anigu kala hormarin baan jeclaan lahaa inaan sameeyo, waxaana u kala horeysiinayaa sidan.

1. Wax ka badalka iyo Kaabista Xeerka Maamuuska M/weynaha iyo Barlamanka
2. Xeerka ka hortaga, xakamaynta iyo ka ganacsiga iyo Tahriibka dadka
3. Xeerka Liisamada Ganacsiga
4. Miisaaniyada Qaranka Sanadka 2021ka
5. Xisaab Xidhada 2018 iyo 2019kii
6. Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah

Anigu in sidaas loo kala hormariyo ayaan soo jeedinayaa, Xeerarkan Free zone-ka iyo dekadaha ma qabo in la soo horaysiiyo waayo waxaan xeerarkaas dalbanay in la helo cid technical expert inaga caasiwa, marka anigu intaas ayaan ku soo koobayaa.

**Md. Maxamed Cabdi Jaamac:-** Gudoomiye iyo Xildhibaano waad salaaman tihiin, anigu kama dheeri meelihii hore ee laga hadlay, makaynu ajandaha ka doodayno waxaynu mudnaanta siin jirnay laba arrimod oo kala ah xeerarku siday u kala diyaarsan yihiin iyo xeerarku siday u kala muhiimsan yihiin ee loogu kala baahi badan yahay, inagoo labadaas arrimood inagoo ka duulaysa waxay muhiimadu tahay hadii tusaale aynu soo horaysiino xeerka xuquuqda caruurta oo gudidu hayso waxay noqonaysa inaynu wakhti siinay xeerkii oo aan diyaar ahayn.

Marka waxay Gudiyada gacantooda waxaynu u daynaynaa siday u soo kala diyaargaroobaan ee u soo kala horeeyaan, wixii golewaynaha horyaalna waxaan odhan lahaa laba qaybood bay isugu jiraan xeerka golaha horyaala qayb uu goluhu bisayl ka muujiyay oo ah xeerarka free zone-ka iyo dekada oo Goluhu soo jeediyay in la helo khabiiro, waana la qabaa oo khabiior muwaadiniin ah baa jooga, marka anigu xeerarkaas waan ka soo horeysin lahaa halkay joogaan oo hore ayaan u soo dhigi lahaa, waxaana u soo kala horaysiinayaa sidan

1. Wax ka badalka iyo Kaabista Xeerka Maamuuska M/weynaha iyo Barlamanka
2. Wax ka badalka iyo Kaabista Xeerka Ururada iyo Axsaabta Siyaasada
3. Xeerka Ganacsiga Aaga Cashuuraha ka caagan
4. Xeerka Hay'adda Dekadaha
5. Xeerka Diiwaangalinta Shirkadaha Aaga Cashuuraha ka caagan

Xeerarka waxaynu u kala horeysiinaynaa hadba siday u soo kala diyaar ahaadaan, waxa kale oo aan intaa ku dari lahaa waa in ajandaha lagu daro oo qodobka kowaad laga dhigo oo Goluhu wax ka yidhaahdo **Xaalada Geeska oo aynu qiimeyno**, intaas ayaan ku soo gabo-gabeynayaa.

**Marwo. Baar Siciid Faarax:-** Bismilaahi, ASC, waan idin wada salaamayaa, Ajandahan ka kooban 17 qodob waa ajande gabi ahaanba loo baahan yahay oo qurux badan sidaan u arko anigu, laakiin hadana wuu kala mudan yahay, waxaana u soo kala horeysiin lahaa sidan.

1. Xeerka ka hortaga, xakamaynta iyo ka ganacsiga iyo Tahriibka dadka
2. Xeerka Ilaalinta Xuquuqda Caruurta
3. Miisaaniyada Qaranka ee Sanadka 2021ka
4. Xisaab Xidhada
5. Xeerka Liisamada Ganacsiga
6. Xeerka Hay'adda Caymiska
7. Xeerka Shaqaalaha

**Md C/raxmaan Sh. Muuse Jaamac:-** Asc, dhamaan Shir-gudoon, Xildhibaano iyo Saxaafadba aad baan idiin salaamayaa, bacda salaan, horta anigu saddex xeer meesha waan ka saari lahaa labada xeer ee free zone-ka iyo xeerka dekadaha, saddexdaas xeer waa DP World oo waxaan soo jeedinayaa in laga saaro kuwaas.

1. Wax ka badalka iyo Kaabista Xeerka Maamuuska M/weynaha iyo Barlamanka
2. Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah
3. Xeerka ka hortaga, xakamaynta iyo ka ganacsiga iyo Tahriibka dadka
4. Xisaab Xidhada 2018kii iyo 2019kii
5. Xeerka Shaqaalaha Dawlada
6. Xeerka Liisamada Ganacsiga
7. Xeerka Ilaalinta Xuquuqda Caruurta

Waxaan leeyahay Xeer Lr. 14 oo ay ku qoran tahay Golewaynaha meel uu ka yimi garanmaayo ma madaxweynaha soo celiyay ma golaha wax ka badalay, ma garanayo anigu siduu inagu soo galay, Xeerarka aynu meesha kaynayno waa inay yihiin xeer diyaar ah, qaar baa mudo ku jiray sida Xeerka sahminta shidaalka wax haystana garan maayo, marka iyagana gudidda haysa waa inay war ka keenaan, WSC.

**Md. Axmed Ducaale Bulaale:-** ASC, horta Gudoomiye Ajandahani waa kii ugu tirabadnaa xaga xeerarka ee la ina horyaaley, marka hore waxaan leeyahay waxay gudiyo gacanta ku hayaan ama golweynuhu gacanta ha ku hayee xeerarka ha laga shaqeysiiyo oo xeerarku ha inaga baxaan yaan laba xeer kal-fadhigu inaga dhamaan, intay Gudiyadu ka shaqeeyan inaga ha ina dhaafaan Xeerarku.

Marka labaad, halkan waxaan u eegayaa mudo dheer maxaa ina horyaaley xeerar maxaase cusub, waxa kale oo ay tahay in xeerarka loo eego maxaa baahi loo qabaa ee dhibaato yaala xalinaya hada sida xeerka tahriibta, xeerka hay’adda caysmiska iyo Xeerka Saxaafada, markaan dhamaantood waa dhibaatooyin waaweyn oo dalka ka jira oo inay xaliyaan loo baahan yahay, marka waxaan u soo horeysiinayaa

1. Wax ka badalka iyo Kaabista Xeerka Maamuuska M/weynaha iyo Barlamanka
2. Xeerka ka hortaga, xakamaynta iyo ka ganacsiga iyo Tahriibka dadka
3. Xeerka Hay’adda Caymiska
4. Wax ka badalka Xeerka Saxaafada

Xeerarka shidaalka, tamartka iyo sahminta shidaalka, saddexdaas xeer mudo dheer bay ina horyaaleen ee maxay inoo horyaaleen ma gudidda ayay ka soo dhamaan waayeen, waa inaynu ka jawaabno waxa ay u dhamaan waayeen.

Xeerarka Aaga ganacsiga ka caagan iyo dekadaha oo ah saddex xeer, hadii aanan khaldanay kal-fadhigii hore waa laga dooday shuruud uun baa lagu xidhay oo xaga aqoonta ayaa la garan waayay mushkilad kale kuma jirtee, marka waxa la dalbaday in

cid aqoon u leh oo inoo fududeysa la helo, maaqaan shir-gudoon ahaan sidaad u xaliseen, markaa xeerarkaas in dad aqoon u leh aynu helno weeye, intaas ayaan ku soo koobayaa, WSC.

**Gudoomiyaha: -** Dooddii way dhamaatay, Xeerarka ajandaha siday u kala diyaar yihiin ee golaha u kala horyimaadaan baa loo soo kala horeysiinayaa, saddexda xeer ee isku sidkan wax kulan guud ah looma sameyn iyagana cidii golaha keentay baa ka jawaabeysa, marka xeerarku waxay u soo kala horeynayaan siday golaha u soo kala horgaadhaan, marka gudi kasta waxaan u soojeedinayaa inaynu xeerarka iska dhamaystirno oo gudi waliba soo gudbiso hadii ay soo dhameyn waydo siduu golaha ku yaal baa loo galayaa. Barito fadhiga waxa la ansixinayaa Ajandaha, Fadhiguna wuu inoo xidhan yahay, WSC.

**Cawad Cali Maxamed**
**Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/G/Wakiilada**
-------------------------------------------------

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI**
-----------------------------------------